Fu,aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

# **Maanso Cusub**:

Mareegta Farshaxan

## Dhidib Weeye Taariikhdu

Xuska Aasaaskii SNM , 6[dii] April, 1981[kii]



Mujaahid Cabdiraxmaan Cawl "Baqdaadi"

Dhidib weeyi taariikhdu iyo waayo soo dhaca e
Dhalaankiyo caruurtay u tahay dhaxal u meel yaale
Dhafoor qiiqlayaal iyo cabdow dhuuncas iyo gaade
Iyo baado dhalandhoola oo dhagar u soo xaytay
Dhidar iyo waraabiyo abees diir wax dhilanaysa
Iyo qaar dhac loo soo diroo shayna dhaafaynin
Waatii dhufays yaday qoteeen loogu soo dhacye

Markuu soodhku dhaashaday markuu dhiigu shalaxbeelay
Markuu qumuca dhiilada sidaa laba dhaclaynaayay
Sida dhool gu' oo da'ay markuu dhibicu heehaabay
Dhab markii dagaal loo galiyo dhiidhi dirirreedka
Dhudi yaa lahaayeey markii lagu dhawaaqaayey
Dharaartaa ninkii maali jiray dhici xaqiisiiye

Ragii dhagaxa tuuree cabdow dhiilada afuufay
Dhacdii ragii loo xidhee jeelka lagu dhaabay
Ragii dhiigu maalmiyo sanado qooyay dhinacooga
Waxay dhumuc lahaayeen ragii dogor madoobaaday
Nimankii dharaariyo habeen dhididku qoynaayay
Ragay dharabtu hoyga u ahayd dhadada jiilaalku
Waxay dheeh lahaayeen ragii dhabanku haaraystay

Dhaxantiyo qabawgiyo ragii dhamacda soo jiidhay
Cashaday dhanaanayd ragii dhacarta saydhaayay
Nimankii dhabiiltamay markii dhalasho loo sheegtay
Kaaraha dhirbaaxada ragii dhawda kaga saaray
Hubka dhuunta ka onkoda ragii hooga dhaxal siiyay
Sida aarka dhogorta leh ragii micida dhiigaystay
Nimankii mashaqaday dhigeen galawgu dheemaalay

Dhexda weelashii kuu xidhee dhidibka kuu taagay
Ragii dhaqan gobeed iyo lahaa sharafta duuxeega
Iyagoon dhadhamin wiilashii adiga kuu dhiibay


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Fu,aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

Ragbaa dhaawacii wali bukaa dhiigu da'ayaaye
Dhay iyo karuur waxay lahayd dheef kamay arage
Daba dhoonadii baan afurin dharabku saarnaaye
Way sibiq dhaqaaqeen ragii dhaabadaw xidhaye

Durya dheer dhabada qaaxo iyo dhinaca Buuhoodle
Dhoobada togdheer iyo burciyo dhumuca Oodweyne
Dhubatiyo Hargeysiyo Barbara dheenta lgu faano

Dhiitacab Gabaylay ka baxay dhabi madaw weynleh
Weeraarta dhamal iyo hulkiyo shiisha dhacaraarta
Dhigta waraqa ceelkii bardiyo gacan dhamaadkiisa
Dhaca xeebta hoosiyo halkay dhaayin miranaysay
Dhoor ololka gooray sidii fiin u dhololaysay
Ee laysku soo wada dhacee dhimasho loo xaytay

Ina Xaashi dhamac waa ogaa jilib dhigeediiye
Maygaagna dhangaduu u siday dheeho qurux leeye
Waa kii Hadraawina dhidhigay waayihii dhacaye
Dheeg iyo Rashiid baan ka hadhin guri dhiskeediiye
Anna dhobi raacaan ahaa dhinac ka taagnaaye
Kama dhixin habeen qudha ilaa maqasha loo dhigaye
Waataan dhanbaalada u diray Urub dhamaandeed

Ayadoo candha dhiibisoo dhays la socon weyday
Dhacan niman u soo jarin ayaa dhiil la hoos galaye
Wuxu soo dhabeeya markuu uriyo dheemaale
Dhadhamadu halkay taalo wey dhugan yaqaaniine
Dhuuni raacu wuu badan yihiyo dhooba nuug yaduye
Aragtidu ma dhaafsana waxay dhuunta mariyaane

Durba wey dhadheen naasihii dhiibsanaan jiray
Dhumucday lahayd waxa latagay dhuubanaw gorofe
Dhuug iyo qaniin baa heloo dhiigi ka idlaaye
Dhugatiyo xanuun baa jidh dilay Kooshinow dhudiye
Waxa ay la dhimiraysantahy waa dhibiijada e
Dhag dheeriyo waxay weheshataa waliba dheefaare

Umadyahay wixii loo dhintay maad dhamays tirine
Dhaliishuna xagaagay ka timi looga soo dhacaye
Waxad baal ka dhaafteen halkii dhaanka loo raraye
Dhabadaad maraysaa ma ah tii dhabta ahayde
Maad dhaadin wali xaajadaad laba dar dhaafteene
Maankaagu muu dhugan xagii dhanbala rogaye
Xilkaad dhabarka saarteen marnaba guul kamaad dhalin e
Wuxuu qaranku dhawraayey baad dhinac u tuurteene


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Fu,aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

Dhalandhoolka geediga socdee dhinacna loo diiday
Salka meel umaad dhigin hurdada lagu dhakoolaye
Dhismo iyo wuxuu kaa mudnaa dhidib an liicayne
Intuu dhabar adaygaa ku jiray way gun dheertahaye

Inta dheraran inta dhuumatiyo dhiilo fidiyaasha
Inta dhagar usoo faydatee dhacanta hoos jiifta
Kuwii eesha gudahaaga dhigay maalintaa dhalatay
Inta soo dhabacanaysa een cidina dhaadaynin
Inta laba dhuslaynayse ee dhuuntu ololayso
Iyo dhuxun-kureebkaa ka badan dhiraha waaweyne
Boqol baa dhufays kugu jira dhuuxa kaa necebe

Intaan nabada dhawraayay bay soo dhex carareene
Dhinbiil iyo balay kugu shideen dhuxulo shaydaan
Dhamac hoos ka nool iyo dabbay kugu dhextuureene
Dhaaxaan is idh yay ku dhicin boholo dhaadeere
Dhagahaa u diidaan runtiyo tii dhabta ahayde
Hadduu dhaqanku sharafweyn lahaa waa dhan qalateene

Dhud aroorka himiladu hadday kuu dhug bixi weydo
haddii aad dhafoorkiyo gacmaha dhabanka saar saarto
Ama laba dhan daymoodta ood dhinacyo eeg eegto
Waxad dhaaftay waxa dhiman hadaad dheehan garanweydo
Dhabbaad uga shalaysaa markay dhabaqdo xaajaduye

Hadduu hoobal dhaantada tumaa dhab ugu luuqeeyo
Ayadoo dhaclaha xidhan markay dhudi ka boodayso
Eey dheeman kuu soo martee dhinaca aad saarto
Hadduu wiil dhalaan ihi dhexgalo dhumucda xoogweynta
uu kala dhantaaloo codkuna laba dhawaaq leeyo
markay dhabaqdo jiibtiyo cagtiyo dheesha iyo heestu
Waa kala dhaqaaqdaan hadaan sacabku dhiibsamine

Haddii uu dhibaalaha aduun dhaawac kugu reebo
Oo uu hamigu kaa dhintoo dhaqash kaa guurto
Oo aad hurdada dhinac la dhigo gama' ka dheeraato
Ood caday ka dhuubnaata ood ciil la dhandhoosho
Dhayalsiga markaad eersatiyo dhago adaygaaga
Dharaaruhu waxay kugu noqdaan dhamac ku guud taale

Hadday dhacanto waa kala hadhaan guusha dhigateene
Waa dhaawac kugu yaal markay talo ku dhaaftaaye
Dheeldheeli geedaan arkaa dhidib la'aaneede
Mar hadday dhiguhu kaa xunyiin waaa dhib mudataaye
Way kala dhantaalayd ilaa dhalsho deediiye
Inta dhiman inata u dhiman intaad dhaaftay baa
badane
Kol haddaad dhaqaaq joogsatood dhaadi kariweyday


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Fu,aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

Hayaan keedu dheeraa haddaan dhaymo loo heline

Marna uma dhagtaagtaan habkii loo dhisi lahaaye
Kii aawadaa dhiman lahaa uma dhawaataane
Inkastuu il dheeryahay shirkaa lagala dhuuntaaye
Adaan kaa dursugayaa ilaa iilka lay dhiga e
Dhaayaha haddmaad furi aduun waa habeen dhacaye.

Bahda mareegta farshaxan waxay kaga qayb galaysaa xuska maalinta aasaaskii SNM , maansada uu curiyey mujaahid Cabriaxmaan Cawl “Baqdaadi’


Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.